Ohio Statewide
Family Engagement Center
Every Child. Every Family. Every School.

# Hagaha Khayraadka Adkaanta Akhriska "Dyslexia" ee Qoysaska Ohio

**Illaa iyo 1 qof 5 tii qofba adduun weynaha waxa ay leeyihiin adkaanta akhriska!**

**Waa maxay adkaanta akhrisku?**

Adkaanta akhrisku waa mid kamid ah naafonimooyinka waxbarasheed ee ugu caansan. Dadka qaba adkaanta akhrisku waxa ay leeyihiin awoodo badan, balse waxa ay leeyihiin dhibaato ah barashada akhriska oo aan la fileynin Dhibaatooyinkani lama xidhiidhaan maskaxda ama dhiirranaanta qofka. Carruurta qaba dhibaatooyinka adkaanta akhriska way baran karaan wax akhriska, ee maskaxdoodu unba si kale u shaqayso. Qoysaska, macallimiinta carruurnimadoodii hore, ama macallimiinta rawdada ayaa ah badanaa kuwa ugu horreeya ee ogaada carruurta ay ku adag yihiin hadalka ama waxbarashada ee dugsiga. Waa muhiim in loo dhug yeesho calaamadaha suuragalka ah ee muujinaya in ay dhici karto in ilmuhu uu leeyahay adkaan akhris. Carruurta qabta adkaanta akhrisku waxa ay muujin karaan calaamado kasta oo isku dhafan. Inkasta oo hal calaamad oo kasta aanay daruuri ka dhigeyn in ilmahaagu qabo adkaan akhris, haddana waa muhiim in aad la hadasho macallimiinta ilmahaaga haddii aad qabto walaacyo.

**Waa maxay calaamadaha muujinaya in ilmahaygu ay dhici karto in uu leeyahay adkaan akhris?**

**Dugsiga barbaarinta**

- Dibu dhac ku yimaadda barashada hadalka
- Ku dhawaaqidda erayadu waxa ay noqon karaan kuwo ku adag ("pusgetti" ayuu ugu dhawaaqayaa "spaghetti")
- "Hadal carruureed" aan dhammaan
- Taariikhda ah in dhibaatooyin akhris ay lahaayeen waalidiinta ama shallaanka
- Xusuusashada heesaha iyo qaafiyadaha xanaanada carruurta ayaa ku noqon karaan caqabad
- Adkaansho ah magacaabista xarfaha/lambarrada
- Ka sheekaynta sheekooyinka ay adag tahay in lala socdo

**Fasalka K-2aad**

- Xarfaha ama isku darka xarfaha lama doonan karo dhawaqyada
- Ku dhawaaqidda erayda fudud sida cat, map, iyo nap ayaa ku adag
- Waxa uu wax u akhriyaa si qunyar ah, waxa uu erayada u akhriyaa si khaldan ama waxa uu wax akhriyaa isaga oo aan dareen cabbireyn
- Waxa uu isku khaldaa erayada iska soo horjeeda sida kahor/kadib, midig/bixix, iwm.

**Fasalka 3aad-5aad**

- Badanaaba waxa uu qiyaasaa erayada maadaama oo aanu ku dhawaaqi karin
- Waxa uu ku wanaagsan yahay ka jawaabista su'aalaha laga keeno qoraalka haddii cod dheer lagu akhriyo
- Waxa ku adag in uu si sax ah ugu dhawaaqo erayada (sida., (e.g., "mazigine" halkii uu ugu dhawaaqi lahaa "magazine")
- Qorista ayaa ku adkaan karta, isaga oo khaladaad higaadda ah oo soo noqnoqda galaya
- Waxa uu ka boodaa ama si khaldan u akhriyaa erayada gaagaaban ee soo noqnoqda

**Fasallada 6aad-12aad**

- Waxa uu wax u akhriyaa si qunyar ah waana uu diiqadoodaa; ma jecla in uu wax akhriyo
- Badanaa waxa uu ka boodaa erayada gaagaaban ama waxa uu ka tagaa qayb kamid ah erayada dhaadheer marka uu cod dheer wax ku akhriyayo
- Su'aa'laha goobo gelidda ah ayaa uu ka doorbidaa su'aalaha buuxi meelaha bannaan ah ama su'aalaha kale ee leh jawaabaha gaagaaban
- Barashada luuqad ajnabi ahi waxa ay noqon kartaa mid ku adag
- Xafiditaanka xaqiiqooyinka, liisaska ama jihooyinku waxa ay ku noqon karaan mid ku adag

**Juun 2024**

THE OHIO STATE UNIVERSITY
CENTER ON EDUCATION AND TRAINING FOR EMPLOYMENT

**Sidee baa caruurta ku nool Ohio looga baadhaa calaamadaha adkaanta akhriska?**

Dugsiyada Ohio waxay dhammaan carruurta ka baadhaan calaamadaha dhibaatooyinka adkaanta akhriska ee ay ka mid yihiin Dugsiga barbaarinta ama Fasalka Koowaad. Qoysaska (ama macallin ogolaansho ka haysta qoyska) ayaa codsan kara baadhista ku aadan dhibaatooyinka adkaanta akhriska fasallada 1-6 sidoo kale. Haddii ilmahaaga la baadho isla markaana dugsigu ogaado inay jiraan calaamado adkaan akhris muujinaya, waxa aad farriin ka heli doontaa dugsiga ilmahaaga. Waxa laga yaabaa in ilmahaaga uu maro baadhis qoto dheer oo ay la socoto taageero waxbarasho oo dheeraad ah oo fasalka dhexdiisa ah. Tan waxa loo yaqaanaa "waxbarid goraal-akhris oo qaabaysan."

Haddii aad jeclaan lahayd inaad ka codsato baadhis dugsiga ilmahaaga si aad u aragto in ilmahaagu uu khatar ugu jiro adkaan akhris, waxa aad booqataa websaytka Xarunta Ka Qaybqaadashada Qoyska ee Gobolka Ohio oo Dhan si aad uga raadsato Waraaqda Codsiga Baadhista Muunadda ah.


**Maxaa iska bedeli doona dugsiga haddii ilmahayga la ogaado inuu qabo calaamadaha adkaanta akhriska?**

Haddii ilmahaaga laga helo calaamadaha adkaanta akhriska, dugsigu waxa uu bixin doonaa taageero fasalka dhexdiisa ah oo xiisadaha waxbarasheed ah. Carruurta qabta adkaanta akhris waxa ay wax kusii baran doonaan isla fasalkii ay hore wax ugu baran jireen. Waxa lagu ogaysiin doonaa waxa uu dugsigu samaynayo si uu uga taageero ilmahaaga waxbarashada.

Arday badan oo qabta adkaan akhris, ama looga shakiyo inay qabaan adkaan akhris, uma baahan doonaan adeegyo waxbarasho gaar ah. Haddii ay u baahan yihiin taageero waxbarasheed, codsiga qiimaynta waxbarashada gaarka ah ee rasmiga ah ayaa la samayn karaa wakhti kasta. Qoysasku waxa ay bilaabi karaan hannaanka waxbarashada gaarka ah iyaga oo u diraya codsi qoraal ah macallinka iyo/ama maamulaha ilmahooda. Waxa aad booqataa websaytka Xarunta Ka-Qaybqaadashada Qoyska ee Gobolka Ohio oo Dhan si aad uga raadsato Waraaqda Codsiga Baadhista Muunadda ah. Waaxda Waxbarashada ee Ohio waxa ay leedahay Istiraatiijiyad Qiimeynta ah oo loogu talagalay Qoysaska, taas oo ah jadwal wakhtiyeedka tallaabooyinka ku jira bilaabidda hannaanka waxbarashada gaarka ah.

**Ilmahaygu dhib ayuu wajahayaa. Sidee baan ugu caawin karaa guriga?**

Waa shaqada dugsiga in uu bixiyo waxbarasho dadweyne oo bilaash ah isla markaana habboon ilmahaaga, adiga iyo qoyskaaguna waxa aad shuraako muhiim ah u tihiin dugsiga ilmahaaga. Waxa aad ka dalban kartaa macallimiinta ilmahaaga fikrado ah waxa aad ku samayn karto gurigaaga, taas oo la jaanqaadeysa waxa dugsigu uu barayo ilmahaaga.




**Maxay tahay inaan ilmahayga uga sheego adkaanta akhriska?**

Ahaanshaha mid dhanka togan wax ka eegaa waa muhiim. Qoys waliba waxa samayn doonaan hab gooni ah oo ay ilmahooda kagala hadlaan wax ku saabsan adkaanta akhriska. Halkan waxaa ah xoogaa fikrado ah oo laguugu talagalay adiga.

- Waxa aad odhan kartaa, "Maskaxeheenu waa sida murqaha oo kale, waxana aanu u baahanahay inaanu ku tababarano adeegsigooda si aanu uga caawino inay koraan. Waan ku jeclahay, halkan waxa aan u joogaa inaan ku caawiyo, macallimiintaaduna sidoo kale."

- "Adkaanta akhrisku waxa ay ka dhigan tahay maskaxdaada waxa ku adkaan karta xarfaha inay la doonato dhawaqyada. Macallinkaaga ayaa kaala shaqayn doona waxyaabaha kugu adag, waxana aynu sidoo kale si wadajir ah isugu deyi karnaa isla waxyaabahaas guriga."
- Ama, waxa aad odhan kartaa, "Waad garanaysaa sidii aad u ahayd mid wakhti adag wajahaya waqtigaagii dugsiga? Waxa aan kala hadli doonaa macallimiintaada arrintaas. Dhammaanteen si kala duwan ayeynu wax u baranaa. Waxa aynu ogaan doonaa qaabka aad sida ugu wanaagsan wax ugu barato."
- Waxa ay noqon kartaa arrin dhiirrigelisa carruurta iyo dadka waaweyn inay maqlaan tusaalayaal ah dadka guulaystay ee qaba adkaanta akhriska.

**Halkee ayaan tegi karaa si aan wax badan uga ogaado adkaanka akhriska iyo Dugsiyada Ohio?**

Sidii ay awalba ahayd, khayraadkaaga ugu horreeya ee ugu wanaagsani waa dugsiga ilmahaaga. Macallimiinteena ku sugan Ohio waxa lagu tababaray istiraatiijiyadaha waxdhigiseed ee ugu wanaagsan si ay u taageeraan dhammaan ardayda. Ilaha kale ee wanaagsani waa Cutubada Ohio ee Jumciyadda Adkaanta Akhriska ee Caalamiga ah "International Dyslexia Association's Ohio Chapters", iyo Understood.org. Waxa aad sidoo kale booqan kartaa websaytka Waaxda Waxbarashada ee Ohio si aad uga hesho tilmaamo iyo ilaha ugu dambeeya ee ku saabsan Taageerooyinka Adkaanta Akhriska ee dugsiyada Ohio. Haddii aad uga baahan yahay waxoogaa taageero ah oo dheeraad ah waalid/daryeel bixiye soo maray hannaanka la shaqaynta dugsiga ilmihiisa, tixgeli inaad la xidhiidho mid kamid ah Hageyaasha Waalidka Ohio "Ohio Parent Mentors".

**Linkiyada Khayraadka**

- Liiska Buugaagta ku saabsan Adkaanta Akhriska ee Carruurta iyo Dadka Waaweyn
- Codsiga Baadhista Adkaanta Akhriska ee Muunadda ah
- Dadka Caanka ah ee Qaba Adkaanta Akhriska
- Liiska Tusaalaha ah ee Calaamadaha Digniinta ah ee Adkaanta Akhriska ee laga soo xigtay Waalidka Ohio "Ohio Parent"
- Buugga Hagaha ee Adkaanta Akhriska ee Ohio ee Dugsiyadu Raacaan
- Sharciyada Taageerada Adkaanta Akhriska ee Ohio
- Macluumaad ku saabsan Adkaanta Akhriska iyo Sharciga Waxbarashada Gaarka ah ee Federaalka ah
- Bogga Websaytka Taageerooyinka Adkaanta Akhriska ee Waaxda Waxbarashada ee Ohio
- Cutubyada Ohio ee Jumciyadda Adkaanta Akhriska ee Caalamiga ah
- Khariiradda Hageyaasha Waalidka Ohio

Waxa aanu si gaar ah ugu mahadnaqaynaa qoysaska iyo macallimiinta Ohio kuwaas oo kala shaqeeyey Waaxda Waxbarashada Ohio iyo Xarunta Ka-Qaybqaadashada Qoyska ee Gobolka Ohio oo Dhan ee Jaamacadda Gobolka Ohio wax ku aadan harumarinta tilmaantan.

Si aad u eegto nooca elegtarooniga ah ee tilmaantan, waxa aad booqataa go.osu.edu/dyslexiaguide.